# Qoraalka (Records) Skuulka iyo Xuquuqda Waalidka

(School Records and Parents' Rights - Somali)

Waraaqaha iskuulka ee ardayga waxa ku qoran warbixin muhiim ah oo ku log leh aayaha ilmaha. Maa daama ay waalidka leh ilmaha naafada ah ay ka qaatan qayb wayn waxbarashada ilmahooda, waxa muhiim ah in ay aad u darsan warbixinta ku qoran qoraalka iskuulka ee ku saabsan ilmaha. Qoraalka iskuulka amaba faylasha ayaa waxa isticmaala macalimiinta iyo shaqaalaha iskuulka waxa ayna wax u dhimi kartaa sida ay u arkaan ilmahaaga. Waa in ay waalidku xaqiijiyaan warbixinta laga qoray ilmahoodu in uu sax yahay iyo inkale. Xuquuqda waalidka ee ku saabsan qoraalka (Records) ayaa waxa ay ku qoran yihiin sharciga dawlada dhexe iyo sharciga goboladaba iyo sharciga loo yaqaan xuquuda qoyska ee waxbarashada Family Educational Rights and Privacy Act (FERPA).

## Waalidku waxa ay xuquuq u leeyhiin in ay arkaan qoraalka Iskuulka ee ilmahooda.

Waalidka (aabaha iyo hoyada,qofka mas'uulka ka ah iyo qof waalid masilaya) ayaa waxa ay xaq u leeyihiin in la tuso oo ay eegi karaan qoraalka iskuulka ee ilmaha. Waxa kalia oo ayna taasi dhici Karin hadii iskuulu uu haysto warqad sharciyaysan oo ka xayuubta mas'uuliyada ilmaha qofka codsanaya qoraalka. Waalidku waxa kale oo ay fiirsan karaan wax alla wixii ku saabsan qiimaynta,qorshaha waxbarashada, iyo meelaynta ilmaha. Hadii ay dhacdo in ay waalidku codsadaan in ay arkaan qoraalda ku saabsan ilmahooda waa in uu iskuulku u ogolaadaa.

Waxa dhici karta in ilmaha lagu wareejin karo xilka ku saabsan qoraalda iskuulka ( ilaa maxkamadu go'aamiso in ilmuhu xilka una qaadi Karin ). Waxase suurto gal ah in waalidku codsan karo qoraalada iskuulka inta inta ilmahoodu ku laban yahay xaga cashuur celinta (dependent).

## Ma dhici kartaa in ay waalidku codsan karaan koobiga qoraalada?

Jawaabtu waa haa. Waalidku way codsan karaan koobiga qoraalda. Iskuulkuna way dhici kartaa in uu lacag ku dalaco waalidka hadii ay taasi ka hor joogsan karto mooyi eh.iskuulku lacag ma waydiin karaan waalidka ku saabsan soo saaritaanka faylasha hore.

## Gorma ayaa ku haboon in ay waalidku codsadaan koobiga faylasha ilmahooda?

Waalidku way codsan karaan helina karaan koobiga faylasha ilmahooda mrkastaba. Gobolka Minnesota, waa in iskuulku si dag dag ah u fuliyaan hadii ay suurto gali waydona waa in ay 10 cisho gudahood ugu jawaabaan waalidka. Waa in ay waalidku heli karaan qoraalada inta ka horaysa kulan amaba dhagaysi ku saabsan baadhitaan, qiimayn, iyo meeleenta ilmaha.

## Iskuulku ma u diidi karaa waalidka faylasha (Records)?

Jawaabtu waa maya. Ha ahaate eh, waxa dhici karta in macalinku uu diido in uu waalidka tuso qoraalada yar yar ee uu ka qoray ardayga kuna jirin faylka ilmaha. Waxa kale oo iskuulku diidi karaa in ay tusaan waalidka qoraalada ku saabsan shaqaalaha iskuulka iyo kuwa ku saabsan booliska iskuulka ee loogu talagaly in loo isticmaalo xaga nabad galyada.

© 2000 PACER Center, Inc. | ACTion Sheet: PHP-c41so
8161 Normandale Blvd. Minneapolis, MN 55437 | Phone (952) 838-9000 | MN Toll-Free (800) 537-2237
PACER@PACER.org | PACER.org

PACER CENTER ACTION INFORMATION SHEETS

## Waalidku ma ka codsan karaan qof kale in uu fahamsiiyo faylasha?

Jawaabtu waa haa. Waa in iskuulku ogaolaada in qof khibrad u leh oo ka tirsan iskuulka uu waalidka u faah faahiya si ay u fahmaan faylasha. Waxa kale oo dhici karta in waalidku ay keensan karaan qof kale oo ka caawiya xaga faylasha.

## Waalidku ma codsan karaan in isbadal lagu sameeyo faylasha iskuulka ee ilmahooda?

Haa. Hadii ay waalidku u rakaan in uu khalad ku jiro warbixinta ilmahooda oo ah mid xuquuqda ilmaha wax u dhimaysa way codsan karaan in isbadal lagu sameeyo. Waa in waalidku waraaq qoraal ah u diraan maamulaha iskuula si loo badlo.

Waana in iskuulku mudo macquulah gudaheed ay ku jawaaban in ay badlayaan iyo inkale. Hadii ay dhacdo in waalidka loo yeli waayo ula jeedadooda, waa in uu iskuulku ogaysiiyaa waalidka go'aakooda iyo xuquuqda ay u leeyihiin in la dhagaysto amaba sida loo codsado.

Waalidku hadii ay qoraal ku codsadaan in la maqlo (hearing), qof u dhaxeeya labada dhinac ayaa isku dhagaysta. Hadii qofka isku dagaysanayaa u xukumo waalidka, waa in iskuulku isbadal ku samaeeyaa faylasha iyaga oo la socodsiinaya waalidka. Hadiise ay dhacdo in uu qofka dhexdhxaadka ehi uu xukumo in warbixinta laga qoray ilmuhu ay tahay mid aan khalad ku jirin wax isbsdal ehi ma dhacayo. Laakiin waalidku waxa ay faylka galin karaan waraaq muujinaysa in ay ka soo hor jeedaan warbixinta oo ayna ku raacsanayn. Waraaqdaasina waxa ay noqonaysaa mid ka mid ah faylka ilmaha oo hadii ay dhacdo in warbixintaa uu codsado qof kale in ay waraaqdaasina ay raacdo.

## Maxaa iman kara hadii ay dhacdo in ilmuhu uuna u baahnayn waxbarashda gaar ahaaneed?

Waa in skuulku la socodsiiyaa waalidka marka warbixinta u khaaska ah ilmaha aan loo baahnayn si waxa loogu qabto xaga waxbarashda. Hadii waalidku ay qoraal ku codsadaan waa in skuulku warbixinta amaba faylasha ilmahooda ay ka masxaan. Waxase iskuulku la hadhi karaa warbixinta ku saabsan ardayga magaciisa,meesha uu ku noolyahay, telafoonka, natiijada, iskuul tagitaanka (attendance) glaaskiisa, heerka waxbarashada, iyo sanadka uu qalin jabiyay.

## Waalidka ka sokow yaa kale oo arki kara faylasha ardayga?

Waalidka waxa kale oo soo raaci kara shaqaale iskuul oo dan wayn kale faylasha ilmaha. Iskuulku waxa uu faylasha u diri karaa dagmo kale oo la rabo in uu ardaygu wax ka barto. Waxa kale oo iskuuladu u diri karaan faylasha hayadaha kale ee qaabilsan sharciyada dhalinta (state juveinal saystem) iyaga oo xeerinaya sharciga u yaal gobolka.

Marka shaqsi amaba hayad kale ay codsadaan faylasha, waa in waalidka la waydiiyaa ogolaansho. Waa in loo sheegaa waalidka faylasha ay codsadeen iyo sababtaba. Waalidka mooyaane qofkii kale ee fiiriya faylasha ilmaha waa in uu qoro. Waana in uu ku qoro magaciisa, tariikhda ito sababta uu u codsaday faylasha ilmaha.

## Ma jiraan meelo kale oo loo dacwiyaa iskuulka mooyaane?

Haa. Hadii iskuulku diido in uu ku tuso faylasha ilmahaaga, amaba ay wax ka badalaan amaba ay u gudbiyaan warbixin adiga oo aan raali ka ahay, waxa aad dacwad u qori kartaa una diri kartaa:

Family Policy Compliance Office
U.S. Department of Education
Washington, DC 20202-4605

Waraaqda dacwada waa in si fiican aad ugu faah faahisa cabashada, adiga oo ku qorayaa magaacda iyo maalmaha, iyo sababta iskuulku kuugu diiday iyo koobiyada la xiriira arinta.

Gobolka Minnesota waalidka leh ilmaha naafada ah waxa ay la xiriiri karaan xafiiska u qaabilsan waxabarashada gaar ahaaneed ee gobolka:

Division of Compliance and Assistance
MN Dept. of Education
1500 Highway 36 West
Roseville, MN 55113-4266
(651) 582-8689

Sharciga gobolka Minnesota, qodobka 13 ee ku saabsan warbixinta ayaa waxa uu dhigayaa habka iyo siyaabaha loo isticmaalo warbixinta ardayga. Waxa uu sharcigu u cadaynaya haydaha kala gadisan dariiq cad oo ay raacaan marka ay rabaan in ay gudbiyaan warbixinta. Waxa kale oo sharcigu u muujinayaa ciqaabta la socota hadii xad gudub uu dhaco. Hadii aad u baahato warbixin dheraad ah, la xiriir:

Information Policy Analysis Division
MN Dept. of Administration
201 Administration Building
50 Sherburne Ave.
St. Paul, MN 55155
(651) 296-6733
(800) 657-3721